

## Sharciga cusub ee ballamaha loo gooyo

Isbitaalka Children's Minnesota, waxa ay shaqaaluhu ogyihiin in ay dadku mashquuli karaan oo aysan mararka qaarkood ilmaha u soo kaxeyn karin ballamahooda. Hase ahaatee, marka loo gooyo ballan iyada oo aan isbitaalka la soo ogeysiin, wakhtigaas lama siin karo ilma kale oo u baahan ballan degdeg ah.

Laga bilaabo Jan. 1, 2025, waxaa la raaci doonaa sharci cusub oo ah ballamaha loo gooyo ee daaweynta guud, takhasuska, caafimaadka dhimirka iyo kilinigyada baxnaaninta. Haddii loo gooyo saddex ballamood ka badan sannadkii, waxay saameyn ku yeelan kartaa in ballan dambe laga qabsado Children's Minnesota.

### Ballamaha oo loo gooyo macnaheedu waa:

- Marka la imaan waayo ballan kilinig laga sameystay;
- Marka goor hore kilinig loo soo sheegi waayo ballan in la beddesho ama in aan la imaaneyn.

### Sharciga ballamaha loo gooyo waxaa raaci doona xarumaha:

1. Daaweynta guud, sida Caafimaadka Iskudhufan ee Maanka;
2. Xarumaha takhasuska, sida dhimirka iyo koboca maskaxda ee carruurta;
3. Adeegyada baxnaaninta;
4. Adeegyada dabiibka caafimaadka dhimirka.

## Sharciga cusub ee ballamaha loo gooyo

Haddii bukaanku u gooyo/imaan waayo saddex ballamood ama ka badan ilaa hal sano gudihis mid ka mid ah xarumaha daaweynta ee kor ku qoran (tusaale ahaan, daaweynta guud, kilinigyada takhasuska, baxnaaninta ama dabiibka caafimaadka dhimirka) ilmahaas waxaa hal sano lagu qori karaa hab kale oo ah in la siiyo hadba hal ballan oo u ah tijaabin.

Adeegyada goobaha waxay ku kala duwan yihiin habka tijaabinta halka sano:

- **Daaweynta guud:** Bukaanka waxaa la siin karaa ballan ah isla maalinta loo helayo marka ay marar badan u gooyaan ballamo fog oo la sameeyey.
- **Kilinigyada Takhasuska:** Bukaanka ballamaha u gooya waxaa loo sameyn karaa ballamo ah toddobaadka lagu jiro oo keliya. Adeegyada takhasuska waxa ay ku kala duwan yihiin habka tijaabinta halka sano. Fadlan kala hadal kilinig(yada) aad ilmaha geysato.
- **Dabiibka baxnaaninta iyo caafimaadka dhimirka:** Marka loo gooyo ballamo waxay qaban karaan markiiba hal ballan oo waxay ka dhigi karaan isla toddobaadka lagu jiro.

Waxaa ilmaha lagu soo celin karaa jadwalka ballamaha caadiga ah hal sano ka dib markay si fiican uga soo gudbaan halka sano ee ah ballamaha tijaabada.

### Habka ogeysiinta

- Ka dib marka ballan loo gooyo/la imaan waayo, waalidka ayaa ogeysiis digniin ah ka heli doona Children's Minnesota. Ogeysiiskaasi waa digniin ah sharciyada cusub ee marka ballamaha loo gooyo.
  - **Ogeysiiska waxaa loogu soo diri doonaa habka ay qoysku doorbidaan in lagula soo xiriir:** farriin ah qoraal, boostada internetka ama in taleefan loo soo diro.
- **Haddii hal sano gudihis loo gooyo saddex ballamood, waxaa la isu soo diri doonaa waraaq ah ogeysiiska kamadambeysta oo waxa la isku wargelinayo waa in ballamaha la qabsanayo loo beddeli doono habka tijaabinta ah ee halka sano.** Waraaqdan waxaa waalidka loogu soo diri karaa kadinkooda internetka ee MyChildren ama waxaa loogu soo diri karaa gurigooda.